

At the time of initial posting on June 25, 2021, individuals using assistive technology may not be able to fully access the information contained in this document. A fully accessible version of the document is in preparation and will be posted as soon as it is ready. We regret any inconvenience that this may cause our readers. For assistance, please send an e-mail to [ocod@fda.hhs.gov](mailto:ocod@fda.hhs.gov) and include 508 Accommodation and the title of the document in the subject line of your e-mail.

## **XAASHIDA MACLUUMAADKA EE LOOGU TALAGALAY TALLAAL QAATAYAASHA IYO DARYEELAYAASHA**

### **FASAXIDA ADEEGSIGA DEGDEGGA AH (EUA) EE TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH EE LAGAGA HORTAGGO CUDURKA KORONA-FAYRAS 2019 (COVID-19) LOOGUNA TALAGALAY SHAKHSIYAADKA DA'DOODU TAHAY 12 SANNO JIR AMA KA WEYN TAHAY**

Waxaa lagu siinayaa tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech si looga hortaggo Cudurka Korona-fayras 2019 (COVID-19) ee uu dhaliyo SARS-CoV-2. Xaashidan Macluumaadku waxay ku qoran xog kaa caawinaysa inaad fahamto khataraha iyo faa'iidooyinka Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech ee laga yaabo inaad hesho maxaa yeelay waxaa hadda jirta aafadda COVID-19.

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech waa tallaal wuxuuna kaa ilaalin karaa inuu kugu dhaco COVID-19. Ma jiro tallaal ay ansixiyeen Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka ee Mareykanku (FDA) oo lagaga hortaggo COVID-19.

Akhriso Xaashidan Macluumaadka si aad u hesho xog ku saabsan tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech. La hadal bixiyaha tallaalka haddii aad su'aalo qabto. Adiga ayaa iska leh ikhtiyaarka qaadashada Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech.

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech waxaa lagu bixiyaa qaab taxane oo 2-qaadasho ah oo ay dhaxeeyaan 3 toddobaad, waxaana lagu mudaa muruqa.

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech ayaa laga yaabaa inuusan difaacin qof walba.

Waxa suurogal ah in Xaashidan Macluumaadka la cusbooneysiiday. Si aad u hesho Xaashida Macluumaadka ee ugu dambeysay, fadlan booqo [www.cvdvaccine.com](http://www.cvdvaccine.com).

### **MAXAAD U BAAHAN TAHAY INAAD OGGAATO KAHOR INTA AADAN QAADAN TALLAALKAN?**

#### **WAA MAXAY COVID-19?**

Cudurka COVID-19 waxaa sababa korona-fayras loo yaqaano SARS-CoV-2. Noocan korona-fayraska ah horey looma arag. Waxaad ku qaadi kartaa COVID-19 taabashada/ka ag dhawaanshaha qof kale oo qaba fayraska. Waa cudur inta badan ku dhaca nidaamka neefsashada oo saameyn ku yeelan kara xubnaha kale. Dadka qaba COVID-19 waxay soo sheegeen astaamo kala duwan, oo isugu jira astaamo khafiif ah illaa jirro daran. Astaamaha waxaa la isku isku arki karaa 2 ilaa 14 maalmood kadib marka uu kugu dhaco fayrasku. Astaamaha waxaa ka mid noqon kara: qandho ama qarqaryo; qufac; neef qabatin; daal; murqo ama jir xanuun; madax xanuun; luminta dhadhanka ama urta oo cusub; cune xanuun; sanko oo cabudhsama ama sanko oo dareera; lallabbo ama matag; shuban.

#### **WAA MAXAY TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER- BIONTECH?**

Tallaalka Covid-19 ee Pfizer-BioNTech waa tallaal aan la ansixin oo ka hortaggi kara COVID-19. Ma jiro tallaal ay ansixisay FDA oo lagaga hortaggo COVID-19.

FDA waxay fasaxday adeegsiga degdegga ah ee Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech si looga ilaaliyo COVID-19 shakhsiyaadka jira 12 sanno iyo wixii ka weyn, kaas oo hoos yimaada Fasaxida Adeegsiga Degdegga ah (EUA).

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan EUA, fiiri qeybta “**Waa maxay Fasaxida Adeegsiga Degdegga ahi (EUA)?**” ee ku taala dhammaadka Xaashidan Macluumaadka.

### **MAXAA WAAJIB AH INAAD U SHEEGTO BIXIYAHAAGA TALLAALKA KAHOR INTA AADAN QAADAN TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?**

**U sheeg bixiyaha tallaalka dhammaan xaaladahaaga caafimaad, kuwaas oo ay kamid yihiin haddii aad:**

- leedahay wax xasaasiyado ah
- lahayd myocarditis (bararka muruqa wadnaha) ama pericarditis (bararka liidka dibada ee wadnaha)
- leedahay qandho
- leedahay cillad dhiig-bax ama aad adeegsatid dhiig fur-fure
- leedahay cillada nidaamka difaaca jirka ama aad qaadatid daawo saameyn ku leh nidaamka difaaca ee jirkaaga
- leedahay uur ama qorsheynayso inaad uur qaado
- naas-nuujinayso
- qaadatay tallaalka kale oo COVID-19 ah
- weligaa ku miyir beeshay irbad lagugu muday

### **YAA QAADANAYA TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?**

FDA waxay fasaxday adeegsiga degdegga ah ee Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech ee shakhsiyaadka jira 12 sanno iyo ka weyn.

### **CIDEE AYAAN QAADAN KARIN TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?**

Waa inaad qaadan Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech haddii aad:

- xasaasiyad daran kala kulantay qaadasho hore (previous dose) oo tallaalkan ah
- xasaasiyad daran ka qaaday mid kamid ah waxyaabaha uu tallaalkani ka kooban yahay

### **WAA MAXAY WAXYAABAHA UU KA KOOBAN YAHAY TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?**

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer BioNTech wuxuu ka kooban yahay waxyaabahan soo socda: mRNA, lipids ((4-hydroxybutyl)azanediyl)bis(hexane-6,1-diyl)bis(2-hexyldecanoate), 2 [(polyethylene glycol)-2000]-N,N-ditetradecylacetamide, 1,2-Distearoyl-sn-glycero-3-phosphocholine, and cholesterol), potassium chloride, monobasic potassium phosphate, sodium chloride, dibasic sodium phosphate dihydrate, iyo sucrose.

### **QAABKEE LOO QAATAA TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?**

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech ayaa lagugu siin doonaa qaabka mudida (durida) muruqa.

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech waa taxane 2-qaadasho ah oo ay dhaxeeyaan 3 toddobaad.

Haddii aad hesho hal qaadasho oo ah Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech, waa inaad heshaa qaadasho labaad oo isla tallaalkan ah 3 toddobaad kadib si loo dhammeystiro taxanaha tallaalka.

### **MIYAA HORE LOO ADEEGSADAY TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH ?**

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech waa tallaalka aan la ansixin. Tijaabooyinka caafimaad [ee la sameeyay], ku dhawaad 23,000 oo qof oo 12 sanno jir ah ama ka weyn ayaa qaatay ugu yaraan 1 qaadasho oo ah tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech.

### **WAA MAXAY FAA'IIDOOYINKA TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?**

Tijaabo caafimaad oo socota, Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech ayaa muujiyay inuu ka hortaggo COVID-19 marka la qaato 2 jeer oo 3 toddobaad u dhaxeeyaan. Muddada uu qofka ka difaaciyo COVID-19 hadda lama ogga.

### **WAA MAXAY KHATARAHA TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?**

Fursadda uu Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech ku sababi karo xasaasiyad daran aad ayay u yar tahay. Xasaasiyada darani waxay badanaa dhacdaa daqiiqado gudahood illaa hal saac kadib qaadashada Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech. Sababtaas awgeed, bixiyahaaga tallaalka ayaa kaa codsan kara inaad joogtid goobta aad ka qaadatay tallaalkaaga si xaaladaada loola socdo tallaalka kadib. Calaamadaha xasaasiyada daran waxaa ka mid noqon kara:

- Neefsashada oo adkaata
- Bararka wejigaaga iyo cunahaaga
- Wadne garaac degdeg ah
- Firiiric xun oo jidhkaaga oo dhan ka soo baxa
- Dawakhaad iyo daciifnimo

Myocarditis (bararka muruqa wadnaha) iyo pericarditis (bararka liidka dibada ee wadnaha) ayaa ku dhacay qaar kamid ah dadka qaatay tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech. Badi dadkan astaamahoodu waxay bilaabmeen dhowr maalmood kadib qaadashada qeybta labaad ee Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech. Fursada inay tani dhacdaa waa mid aad u hooseysa. Waa inaad si degdeg ah u raadsataa caawimo caafimaad haddii aad isku aragtid mid kamid astaamahan soo socda kadib markaad qaadatid Tallaalka Covid-19 ee Pfizer-BioNTech:

- Laab xanuun
- Neef qabatin
- Dareenka wadne garaac degdeg ah, badan ama aan caadi ahayn.

Waxyeellooyinka weheliya Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech ee lasoo sheegay waxaa ka mid ah:

- dareen-celin xasaasiyadeed oo daran
- dareen-celinta xasaasiyadda ee aan darnayn sida finanka, cuncunka, kuus-kuuska, ama bararka wejiga ah
- myocarditis (bararka muruqa wadnaha)
- pericarditis (bararka liidka dibada ee wadnaha)
- xanuunka goobta muditaanka
- daal
- madax-xanuun
- murqo xanuun
- Qarqaryo
- xanuunka kala-goosyada
- xummad
- bararka goobta muditaanka
- guduudashada goobta muditaanka
- lallabbo
- dareemid caafimaad darro
- bararka qanjidhada yaryar (lymphadenopathy)
- shuban
- matag
- gacan xanuun

Waxa suurogal ah in kuwani aysan ahayn dhammaan waxyeellooyinka weheliya Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech. Waxyeellooyin weheliya oo daran oo lama filaan ah ayaa dhici kara. Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech wali tijaabooyin caafimaad ayaa lagu daraaseynayaa.

### **MAXAAN KU SAMEEYAA WAXYEELLOOYINKA WEHELIYA?**

Haddii aad isku arragto xasaasiyad daran, wac 9-1-1, ama tag cisbitaalka kuugu dhow.

Wac bixiyaha tallaalka ama bixiyaha daryeelka caafimaadka haddii aad qabtid waxyeellooyin weheliya oo ku dhibaya ama haddii aysan tagin.

U sheeg waxyeellooyinka weheliya **FDA/CDC Nidaamka Ka Warbixinta Dhacdada Daran ee Tallaalka (VAERS)**. Lambarka wicitaankiisu bilaashka yahay ee VAERS waa 1-800-822-7967 ama ku soo gudbi onlayn <https://vaers.hhs.gov/reportevent.html>. Fadlan ku dar "Pfizer-BioNTech COVID-19 Vaccine EUA" sadarka koowaad ee sanduuqa #18 ee foomka warbixinta.

Intaas waxaa dheer, waxaad waxyeellooyinka weheliya tallaalka ugu soo gudbin kartaa Pfizer Inc. macluumaadka xiriirka ee hoos ku qoran.

<b>Bogga internetka</b>	<b>Lambarka faakiska</b>	<b>Lambarka taleefanka</b>
<a href="http://www.pfizersafetyreporting.com">www.pfizersafetyreporting.com</a>	1-866-635-8337	1-800-438-1985

Waxaa kale oo lagu siin karaa ikhtiyaar aad iskaga diiwaangeliso v-safe. V-safe waa qalab ikhtiyaari ah oo cusub oo lagu shubto taleefanka casriga ah oo adeegsada farriimaha qoraalka ah iyo sahaminta internetka si loola socdo xaaladda dadka la tallaalay loona aqoonsado waxyeellooyinka weheliya ee dhalan kara kadib tallaalka COVID-19. V-safe wuxuu weyddiyaa su'aalo ka caawiya CDC inay la socdaan badbaadada tallaalka COVID-19. V-safe sidoo kale wuxuu bixiyaa xasuusinta qaadashada labaad haddii loo baahdo iyo dabagalka tooska ah ee

taleefanka ee ay CDC sameeyso haddii ka qeybqaatayaashu soo sheegaan saameyn caafimaad oo weyn kadib tallaalka COVID-19. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sida la isku diiwaangeliyo, booqo: [www.cdc.gov/vsafe](http://www.cdc.gov/vsafe).

**KA WARAN HADDII AAN GO'AANSADO IN AANAN QAADAN TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?**

Adiga ayaa iska leh ikhtiyaarka qaadashada ama diidmada Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech. Haddii aad go'aansato inaad qaadatid, waxba kama beddeli doonto daryeelkaaga caafimaad ee caadiga ah.

**MA JIRAAN XULASHOYIN KALE OO LAGAGA HORTAGGI KARO COVID-19 OO AAN AHAYN TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?**

Wakhtigan xaadirka ah, ma jiro tallaalka kale oo la ansixiyay oo la heli karo oo lagaga hortaggo COVID-19. Tallaalka kale oo lagaga hortaggo COVID-19 ayaa lagu heli karaa Fasaxida Adeegsiga Degdegga ah.

**TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH MA LA QAADAN KARAA TALLAALADA KALE?**

Ma jiro wax xog ah oo ku saabsan wada adeegsiga Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech iyo tallaallada kale.

**MAXAA DHACAYA HADDII AAN UUR LEEYAHAY AMA AAN NAAS-NUUJINAYO?**

Haddii aad uur leedahay ama aad naas-nuujinayso, kala hadal xulashooyinkaaga bixiyahaaga daryeelka caafimaad.

**TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH MIYUU I QAADSIIN DOONAA COVID-19?**

Maya. Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech kuma koobna SARS-CoV-2 kumana qaadsiin karo COVID-19.


**HEYSO KAARKAAGA TALLAALKA**

Markaad qaadato qaadashada ugu horreysa, waxaad heli doontaa kaarka tallaalka kaas oo ku tusaya goorta aad u soo noqonayso qaadashada labaad ee tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech. Xusuusnow inaad soo qaadato kaarkaaga marka aad soo noqonayso.

**XOG DHEERAAD AH**

Haddii aad su'aalo qabtid, booqo bogga internetka ama wac lambarka taleefanka ee hoos ku qoran.

Si aad u hesho Xaashiyaha Macluumaadka ee ugu dambeeyay, fadlan sawir koodka QR ee hoos ku yaala.

<b>Bogga internetka ee caalamiga ah</b>	<b>Lambarka taleefanka</b>
<p data-bbox="329 1671 605 1696"><a href="http://www.cvdvaccine.com">www.cvdvaccine.com</a></p> 	<p data-bbox="963 1724 1211 1787">1-877-829-2619 (1-877-VAX-CO19)</p>

## **SIDEE AYAAN WAX BADAN KU OGGAAN KARAA?**

- Weydii bixiyaha tallaalka.
- Ka booqo CDC halkan <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/index.html>.
- Ka booqo FDA halkan <https://www.fda.gov/emergency-preparedness-and-response/mcm-legal-regulatory-and-policy-framework/emergency-use-authorization>.
- La xiriir waaxda caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga ama gobolkaaga.

## **XAGGEE LAGU QORI DOONAA XOGTA TALLAALKAYGA?**

Bixiyaha tallaalku wuxuu ku qori karaa xogta tallaalkaaga Nidaamka Macluumaadka Tallaalka (IIS) ee maamulka gobolkaaga/degmadaada ama nidaam kale oo loogu talagalay. Tani waxay xaqiijin doontaa inaad hesho isla tallaalkaas marka aad u soo laabato qaadasho labaad. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan IISs booqo:

<https://www.cdc.gov/vaccines/programs/iis/about.html>.

## **MIYAA LA IGU SOO DAALACI KARAA KHIDMADA MAAMULKA EE QAADASHADA TALLAALKA COVID-19?**

Maya. Wakhtigan xaadirka ah, bixiyuhu kuguma soo daalaci karo lacagta qaadashada tallaalka, kaamana qaadi karo khidmada maamulka tallaalka ee aad jeebkaaga ka bixisid amaba khidmad kale haddii aad kaliya qaadanaysid tallaalka COVID-19. Si kastaba ha noqotee, bixiyeyaasha tallaalku waxay ka qaadan karaan magdhow munaasab ah barnaamijka ama qorshaha daboolka khidmadaha maamulka tallaalka COVID-19 ee uu leeyahay qofka qaadanaya tallaalku (caymis gaar ah, Medicare, Medicaid, Barnaamijka Dadka aan Caymiska Lahayn ee Kheyraadka Caafimaadka & Maamulka Adeegyada [HRSA] ee loogu talagalay dadka tallaalka qaadanaya ee aan caymis lahayn).

## **XAGGEE AYAAN U GUDBIN KARAA KIISASKA KHIYAAMADA EE LA TUHMO?**

Shakhsiyaadka oggaada xadgudubyo suurtoagal ah oo ka dhan ah shuruudaha Barnaamijka Tallaalka COVID-19 ee CDC, waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay u soo sheegaan Xafiiska Kormeeraha Guud, Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka, 1-800-HHS-TIPS ama <https://TIPS.HHS.GOV>

## **WAA MAXAY BARNAMIJKA TAAGEERADA MAGDHOWGA DHAAWACU?**

Barnaamijka Taageerada Magdhowga Dhaawacu (CICP) waa barnaamij federaali ah oo laga yaabo inuu bixiyo kharashaadka daryeelka caafimaad iyo kharashaadka kale ee gaarka ah ee qaar kamid ah dadka sida daran ugu dhaawacma daawooyinka ama tallaallada qaarkood, oo uu ku jiro tallaalkani. Guud ahaan, sheegashada waa in loo gudbiyaa CICP hal (1) sanno gudahii laga bilaabo taariikhda tallaalka la qaatay. Si aad wax badan uga oggaato barnaamijkan, booqo [www.hrsa.gov/cicp/](http://www.hrsa.gov/cicp/) ama wac 1-855-266-2427.

## **WAA MAXAY FASAXIDA ADEEGSIGA DEGDEGGA AHI (EUA)?**

FDA-da Mareykanka ayaa fasaxday tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech iyadoo adeegsanaysa hanaanka helitaanka degdegga ah ee loo yaqaan EUA. EUA waxaa taageera bayaanka Xoghayaha Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (HHS) ee dhigaya inay jiraan durufo khasbaya adeegsiga degdegga ah ee daawooyinka iyo badeecooyinka bayoolojiga inta ay jirto aafadda COVID-19.

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech lama marin dib-u-eegis la mid ah tan la mariyo badeecadaha ay ansixisay ama aqbashay FDA. FDA ayaa soo saari karta EUA marka shuruudaha qaarkood la buuxiyo, kuwaas oo ay ku jiraan marka aysan jirin ikhtiyaaro kale oo wanaagssan, la aqbali karo lana heli karo. Intaas waxaa dheer, go'aanka FDA wuxuu ku saleysan yahay caddeynta cilmiyeed ee dhameyska tiran lana heli karo ee muujineysa in

badeecadu ay waxtar u yeelan karto ka hortagga COVID-19 inta ay jirto aafadda COVID-19 iyo in faa'iidooyinka la ogyahay iyo kuwa suurtagalka ah ee badeecadu ay ka badan yihiin khataraha la ogyahay iyo kuwa suurtagalka ah ee badeecada. Dhammaan shuruudahan waa in la buuxiyaa si loogu oggolaado in badeecada loo isticmaalo daaweynta bukaannada inta ay jirto aafadda COVID-19.

EUA-da loogu talagalay tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech wuxuu shaqeynayaa inta lagu gudajiro bayaanka COVID-19 EUA ee khasbaya adeegsiga degdegga ah ee badeecadan, ilaa la joojiyo ama laga noqdo mooyee (markaas oo wixii ka danbeeya aan badeecada la isicmaali karin?



Waxaa warshadeeyay  
Pfizer Inc., New York, NY 10017

**BIONTECH**

Waxaa loo warshadeeyay  
BioNTech Manufacturing GmbH  
An der Goldgrube 12  
55131 Mainz, Germany

LAB-1451-4.2a

Waxa wax ka beddelid lagu sameeyay: 25 Juun 2021



FDA waxay turjumaadan adeeg ahaan ugu fidisaa macaamiisha caalamiga ah ee ballaadhan. Waxaan rajeyneynaa in turjumaadani ay noqoto mid waxtar kuu leh. Inkasta oo wakaaladu isku dayday inay hesho turjumaad sida ugu macquulsan ugu dhiganta nooca Ingiriisiga ah, haddana waxaan ogsoonahay in noocyada la tarjumay aysan noqon karin kuwo u saxsan, u cad, ama u dhammeystiran sida nooca Ingiriisiga oo kale. Nooca rasmiga ah ee dukumintigani waa nooca Ingiriisiga.